

Conjunctivitis (Pinkeye)

Taariikhda:

Gacaliye Waalid ama Wakiil,

Ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu la kulmay **indha-guduud (pinkeye)** intii uu joogay xanaanada ilmaha.

Maxay tahay indha-guduud?

Indha-guduudku waa holac (guduud, barar) ku yimaada dusha sare ee isha xiribaha baadka. Waxa jira dhawr waxyaabood oo sababa indha-guduudka. Marmar waxa keena fayras iyo bakteeriyada ku faafi karta min qof ilaa qof. Indha-guduudka xasaasiyada iyo kiimikada waxa keena jidh-diidmo oo lama kala qaado.

Waa maxay calaamadaha indha-guduudku?

Qofka qaba indha-guduudka il ama indhaha ayaa guduuta iyo dheecaan ka da'aya. Dheecaankaas wuxu noqon karaa bilaa midab, biyo-biyo ah (sida ilmada) ama cadaan adag ama malax jaalle ah. Baadadku habeenkii ayaa laga yaabaa inay isku-dhagaan kadib hurdada. Marmar indhuhu waxay yeeshaan cuncun ama xanuun. Fayrasyada qaar iyo bakteeriyada dhalisa indha-guduudka ayaa keena qandho, qufac iyo infekshanka dhagaha.

Intee ayey gaadhsiisan tahay ba'naanta indha-guduudku?

Indha-guduudka hargabka ah ama bakteeriyada ah sida badan iskiis ayuu u tagaa maalmo kadib, oo si nadiir ayuu indhaha wax u yeelaa. Si aad uga badbaado, qofka qaba indha-guduudku waa inuu qiimeeyo takhtar.

Siduu qofku u qaadi karaa indha-guduudka?

Indha-guduudka hargabka ah ama bakteeriyada ah wuxu si sahlan ugu faafaa taabashada dheecaanla indhaha, sanko, iyo afka qofka qaba xanuunka. Taas waa taabshada qaof ilaa qof ama qalab ama shay wash leh.

Intee in le'eg ayey ku qaadataa inuu ku qaado indha-guduudka kadib la-kulanka qofka qaba indha-guduudka?

Qadarka wakhtiga u dhaxeeya la kulanka iyo qaaditaanka indha-guduudka iyo muujinta calaamaduhu waa kala duwan tahay iyada oo ku xidhan waxa keenay.

Goorma ayaa qofka qaba indha-guduudku uu cid qaadsiin karaa?

Indha-guduudka bakteeriyada waa la kala qaadaa ilaa 24 saac kadib bilowga antibaayootiga ama calaamaduhu tagaan. Indhaguduudka hargabka waa la is-qaadsiyaa ilaa guduudku iyo dheecaanku baaba'ayo.

Sideen uga ilaalin karaa ilmahayaga ama kuwa kaleba inay qaadaan indha-guduudka?

- Si fiican oo joogto ah u dhaq gacmaha, gaar ahaan markaad masaxdo indhaha ama sanko ama taabato qof qaba indha-guduud.
- Dabool qufaca iyo hindhisada oo ku rid xarqadaha qashinka qubka.
- Iska jir taabashada indhaha.
- Iskajir wadaaga cuntada, cabbitaanka, iyo waxyaabaha kale ee taabata afka, sida qaadooyinka, cadayga ama tuwaalada.
- KU dhaq biyo saabuun leh ama mashiinka weelka iyo qaadooyinka.
- Dhaq, dhaqdhaq oo jeermiska ka dil alaabta ciyaarta ee taabta afka ilmaha kahor isticmaalkeeda.

Maxay tahay daawada indha-guduudka?

Qofka qaba **indha-guduudka** waa inuu markasta arkaa takhtar. Indha-guduudka bakteeriyada waxa lagu daweyaa antibaayootik tuujis ag, dhibcaha indhaha, ama marmar antibaayootik afka laga qaato ilmaha dhaga-xanuunkana qaba. Indha-guduudka hargabku daawo ma leh.

Haddii uu ilmuhu qaado indha-guduud, ma inuu ka joogaa xanaanada ilmaha?

Haa, iyada oo indha-guduudka ay keentay xasaasiyad ama kiimiko mooyaane. Guud ahaan ilmaha qaba indha-guduudka waa inay ka joogaan xanaanada ilmaha ilaa inta indhaha dheecaanku ka joogsanayo. Haddii takhtarku cilada ku sheego indha-guduudka bakteeriyada, ilmuhu wuu ku noqon karaa xanaanada kadib qaadashada antibaayootiga ugu yaraan 24 saac.